Horn Institute for Peace and Development

# Kulan-madaxeedka Dowlad-goboleedyada ee Dhuusamareeb Iyo Masiirka Doorashooyinka Dalka

## Qormo Kooban

July 2020

## Hordhac

Maalinimadii Khamiista, 09 July waxaa magaalada Dhuusamareeb, xarunta maamul-goboleedka Galmudug, ka bilawday qabanqaabada shir-madaxeed ay ka qayb-galayaan madaxweynayaasha shanta maamul-goboleed ee dalka (Puntland, Galmudug, Hirshabeelle, Koofur-Galbeed iyo Jubaland). Shirkan ayaa ku soo beegmay xilli uu fashilmay kulankii ay yeelan lahaayeen madaxweynaha Jamhuuriyadda Maxamed Cabdullahi Farmaajo iyo madaxda maamul-goboleedyada.[1]

Kulankan ayaa fashilmay kadib markii madaxweyne Farmaajo uu hakin waayay doodihii Golaha Shacabka uu ka doodayay afar xeer oo dhammaystir u noqonaya sharciga doorashada 2020 (Kuraasta gobolada waqooyi, qoonddada haweenka, matalaadda Gobolka Banaadir, deegaameenta kuraasta Golaha Shacabka). Xeerarkaas oo ay maamul-goboleedyadu ka muujiyeen cabasho ku salaysan in hannaanka Golaha Shacabku u maaraynayo meel-marintooda ay tahay mid baal-marsan habraaca Dastuurku tibaaxayo.

Waxa kale oo ay madaxda maamul-goboleedyadu dareen kaa la mid ah ka muujiyeen, qorshaha doorashada ee ay gudoomiyaha Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka (GMDQ), Gd. Xaliimo Ismaaciil ka horjeedisay Golaha Shacabka, kaasoo daaha ka rogay in hannaanka doorashada ee ku xusan sharciga doorashooyinka 2020, aanu dalka ka hirgeli karin muddada ka dhiman xil-haynta Barlamaanka iyo Madaxweynaha[2], taasoo si dadban u muujisay in ay lama huraan tahay in Barlamaanka iyo Madaxweynuhu helaan muddo kororsi.

Waxaa intaa dheer in Aqalka Sare ee Barlamaanku ka horyimid hannaanka Golaha Shacabku u maaraynayo meel-marinta xeerarka dhammaystirka u ah sharciga doorashooyinka. Labo warqadood oo muddo labo toddobaad gudahood ah uu soo saaray Guddoomiyaha Aqalka Sare, Md. Cabdi Xaashi Cabdullaahi, ayuu ku xusay in hab-raaca Golaha Shacbku u maray meel-marinta xeerarka afarta ah uu baal-marsan yahay hab-raaca sharci dejinta dalka,[3] isaga oo uga digay

[1] Horseed Media, Muqdisho: Shirkii Madaxda Federaalka iyo Maamul Goboleedyada oo Baaqday, July 5, 2020, https://horseedmedia.net/2020/07/05/muqdisho-shirkii-madaxda-federaalka-iyo-maamul-goboleedyada-oo-baaqday/

[2] Guddiiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka, Hadal-jeedinta Guddoomiyaha Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka, Mrw Halima Ismail Ibrahim, Juun 27, 2020.

[3] Golaha Aqalka Sare ee BFS, Go'aanka Guddomiyaha Aqalka Sare ee Ku aaddan Been-abuurka Laga Sameeyay Xeerarkii ay Guddiga Wadajirka ah ee BFS u soo gudbiyeen Guddoonka Lbada Aqal ee BFS kuna Saabsanaa Dhamaystirka Sharciga Doorashooyinka Qaranka eeHeer Federaal, 24/06/2020, Muqdisho.

GMDQ in xeerarka Golaha Shacbku meel-mariyay doorasho lagu qabto, tan iyo inta laga saxayo xeerarkaas.[4]

Madasha Xisbiyada Qaran iyo Xisbiga Wadajir ayaa ayagana dhankooda si kala gooni-gooni ah walaac uga muujiyay hab-dhaqanka Golaha Shacabka, iyo qorshaha doorashada ee uu soo bandhigay GMDQ[5]. Iyada oo sidoo kalena ay dad isugu soo baxay fagaaraha Daljirka Dahsoon maalinimadii 5 June, ay muujiyeen cabasho ka dhan ah muddo-kororsiga la hadal-hayo in ay damacsan yihiin Guddoonka Baarlamaanka iyo Madaxweynaha[6], kaasoo ay ku sheegeen inuu yahay mid khilaafsan Dastuurka.

Qormadan kooban waxaan ku eegaynaa ahmiyadda shir-madaxeedka Dhuusamareeb uu u leeyahay in dalka ay ka dhacdo doorasho heshiis lagu yahay nooceeda iyo xilligeeda.

## Xilliga Shirku Ku Soo Beegmay iyo Ahmiyaddiisa

Shir-madaxeedka Dhuusamareeb waxa uu ku soo beegmay xilli xasaasi ah, iyada oo muddo-xileedka dastuuriga ah ee Barlamaanka ay ka dhiman tahay 3 bilood halka muddo-xileedka madaxweynaha ay ka dhiman tahay 6 bilood. Dhanka kalana is faham-waaga u dhexeeya golayaasha Barlamaanka (Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare) ayaa saamayn ku yeeshay meel-marinta xeerarkii dhammaystirka u noqon lahaa sharciga doorashada 2020. Halka GMDQ uu lumiyay kalsoonidii ay ku qabeen maamul-goboleedyada iyo xooggaga siyaasadeed ee dalka, kadib markii qorshaha doorashooyinka ee guddigu caddeeyay in doorashadu aanay ku qabsoomi karin xilligeeda.

Arrimaha kor ku xusan waxa ay ka dhigayaan shir-madaxeedka Dhuusamareeb mid taariikhi ah, oo mas’uuliyad aad u ballaaran dusha u saaraya madaxda ka qayb-galaysa shirkaa, oo looga fadhiyo in ay la yimaadaan xal maangal ah oo furdaamiya siyaasadda cakiran ee hareysay masiirka doorashooyinka dalka.

---

[4] Golaha Aqalka Sare ee BFS, Xafiiska Guddoomiyaha, Raacsiin Go’aankii Guddoomiyaha Aqalka Sare Ee Soo Baxay 24/06/2020 Kuna Saabsanaa Been Abuurkii Lagu sameeyay Afartii Xeer ee Ay Soo Diyaariyeen Guddigii Wadajirka Ahaa Ee Labada Aqal B.F.S, 07/07/2020, Muqdisho.

[5] Xisbiga Wadajir, War saxaafadeed ku aaddan Hindisa Sharciyeedka Xeerka Astaynta iyo Daadjinta Kuraasta, Muqdisho, 18/06/20
Madashada Xisbiyada Qaran, Warsaxaafadeed Ku Saabsan Doorashada Dalka, Muqdisho, June 20, 2020.
Xisbiga Wadajir,Press Statement on withdrawal of confidence from National Independent Electoral Commission (NIEC), 28/06/20, Mogadishu-Somalia.

[6] Madasha Xisbiyada Qaran, Mowqifka Madasha ee Hadal jeedintii Xaliimo Ismaaciil, Muqdisho, June 28, 2020

Qabsoomidda shirkan waxa u durbaba bannaanka keenay kala aragti-duwanaashaha u dhexeysa Ra'iisal-wasaare Kheyre iyo Madaxweyne Farmaajo, iyadoo hadal iyo qoraal wadajira oo ka yimid dhanka Ra'iisal-wasaaraha lagu sheegay in ay lagamamaarmaan tahay in doorashadu waqtigeeda ku dhacdo ayna noqoto mid la isla ogol yahay, taasoo haddii ay dhici weydo abuuri karta "qalalaaso siyaasadeed, mid amni iyo mid dastuur."[7] Halka Madaxweyne Farmaajo uu soo saaray qoraal u eg mid uu kaga falcelinayo midka ra'iisal-wasaaraha isaga oo sheegay in doorashadu waqtigeeda ku dhacdo haseyeeshee raacsiiyay dhowr weerood oo muujinaya in aanay doorashada waqtigeeda ku dhacaynin, weerahaa oo kala ah:-

1- In la hormariyo hannaanka doorashashada

2- In awoodda loo sii dhoweeyo shacabka Soomaaliyeed

3- In doorashada la waafajiyo sharciga doorashooyinka[8]

Saddexdaa weerood waxa ay si cad u tibaaxayaan in nooca doorashada ee uu madaxweynuhu ka hadlayo ay tahay doorasho qof iyo cod ah, oo golayaasha Barlmaanku ku guuldaraysteen in si wadajira ah oo Dastuurka waafaqsan ay u soo saaraan xeerarkii dhammaystirka u noqon lahaa sharciga doorashooyinka 2020, halka qorshaha GMDQ uu caddeeyay in doorashada caynkan ah aanay ku dhici karin waqtigeeda.

Hadalka Ra'iisal-wasaare Kheyre ayaa mugdi badan geliyay dedaalkii Golaha Shacabka iyo GMDQ ee ku aaddanaa in ay helaan fursad muddo kororsi, oo u suuragelisa in ay ku qabtaan doorasho qof iyo cod ah. Durbaba waxaa soo baxaya warar sheegaya in Guddoonka Baarlmanaaku ay cabasho ka dhan ah hadalkii iyo qoraalkii ra'iisal-wasaaraha ay u gudbiyeen Madaxweyne Farmaajo.

Kala aragti duwanaashaha Madaxweynaha iyo Ra'iisal-wasaaraha ee ku aaddan nooca doorashada iyo waqtigeeda waa arrin kale oo ahmiyad dheeri ah siinaysa shir-madaxeedka Dhuusamareeb, sarena u sii qaadaysa culayska mas'uulayadeed ee saaran madaxda ku shirsan halkaa.

---

[7] Xafiiska Ra'iisal Wasaaraha, Qeybta Warbaahinta iyo Isgaarsiinta, Ra'iisal wasaare Kheyre: Muddo kordhintu Waxay Horseeddaa Qalaalase Siyaasadeed, Mid Amni Iyo Mid Dastuur, July 09, 2020, Muqdisho, Soomaaliya

[8] Madaxtooyada Jamhuuriyadda Fedraalka Soomaaliya, Xafiiska Warfaafinta & Xiriirka Warbaahinta, Madaxweyne Farmaajo oo Soo Dhaweeyay Baaqa Golaha Wasiirada ee Doorashooyinka, Luulyo 09, 2020

## Ajendaha Shirka

Shir-madaxeedka Dhuusamareeb waxa loo badinayaa in uu leeyahay hal ajende, kaasoo ah qabsoomidda doorasho heshiis lagu yahay oo ku dhacda xilligeeda dastuuriga ah. Waxa ay qiyaastu u badan tahay in dhammaan madaxda maamul-goboleedyadu ka midaysan yihiin in nooca doorashadu noqoto mid dadban ama tii 2016 ka dhacday dalka oo la cayiliyey (2016+), waana arrinkan midka suuragal ka dhigay in madaxda maamul-goboleedayada oo ay la aheyd Madaxweyne Farmaajo in ay u kala sokeeyaan, ay si wadajir ah u go'aansadaan in ay ku kulmaan shir aanu madaxweynuhu qayb ka ahayn. Ka sokoow in madaxda maamul-goboleedyadu ay isaga aragti dhow yihiin nooca doorashada, ayna ka gows haystaan muddo kororsi, waxaa la qiyaasayaa in gaabinta Madaxweyne Farmaajo uu ka gaabiyay in uu madaxda maamul-goboleedyada ka talo geliyo masiirka doorashooyinka dalka, isaga oo isku koobay Golaha Shacabka iyo GMDQ, ay keentay in madaxda maamulladii la ollogga ahaa ay ka digo-rogtaan, oo ay u istaagaan ka mirodhalinta qabsoomidda doorasho heshiis lagu wada yahay.

Waxaa iyana xusid mudan in kala argti duwanaashaha madaxweynaha iyo ra'iisal-wasaaraha oo sida loo badinayo soo if baxday xilligii khilaafku ka dhex-aloosmay labada gole ee Baarlamaanka bishii tagtay ee June, iyada oo sida dad warkoodu loo qaateen yahay sheegeen in ra'iisal-wasaaruhu ku mawqif noqday Gudoomiyaha Aqalka Sare, ayaa iyana waxaa la dhihi karaa waxaa ay dhiirigelisay madaxda maamulladii uu madaxweynuhu u haystay in ay dhankiisa yihiin.

## Natiijada Laga Filan Karo Shirka

Doodo badan ayay isla dhexmarayeen dadka isha ku haya dhaqdhaqaaqyada ka socda Dhuusamareeb, tan ayo maalintii Khamiista ahayd ee ay madaxdu halkaa u jihaysatay, qaar dadkaa kamid ah waxa ay aaminsan yihiin in Madaxweyne Farmaajo uu galaangal u leeyahay shirka, sidii horay loogaga bartayna uu farsamooyinkiisa siyaasadeed u adeegsan doono in shirka lagu kala tago natiijo la'aan, qaar kale ayaa aaminsan in aanay jirin kala aragti-duwanaasho u dhexeysa madaxweynaha iyo ra'iisal-wasaarihiisa, sheekooyinka soo if baxayna ay yihiin riwaayad loogu talogalay indho-sarcaad, taasoo u fududeyn doonta in madaxweynuhu u diro ra'iisal-wasaaraha Dhuusamareeb si uu natiijada shirka ugu falaado!.

Ugu horreyn waxaa habboon in la isla garto in shirka Dhuusamareeb uu culays siyaasadeed ku yahay Madaxweyne Farmaajo; marka hore waxa madaxda maamul-goboleedyadu diideen gogoshii uu u fidiyay; marka xigana shir looga arrinsanayo masiirka dalka oo aanu talo ku lahayn ayaa ka dhacay dalkii uu hogaankiisa hayay. Taa marka laga soo tago, gogosha Dhuusamareeb taalla hadii talooyin wax ku ool u ah dadka iyo dalka Soomaaliyeed ay ka soo bixi waayaan waxa ay noqonaysaa gogol ceebeed, madaxda Dhuusamareeb ka arrimisana lagama fili karo in ay fashil lugahooda ku doontaan, waxa ay ahayd in aanay marka horaba gogol dhigin, haddiise ay dhigeen waxa laga filan karo waa in mas'uuliyaddooda taariikhiga ah ay qaataan oo iyaga iyo madaxda martida u ahba ay siyaasadda dalka af u bixiyaan. Dhanka kale maamulka Koofur-galbeed sanad ka hor ayay caddeeyeen nooca doorashada ay rabaan oo ah mid dadban, Hirshabeelle ayaa iyana mowqifkeeda ku aaddan in nooca doorashadu noqdo mid heshiis lagu yahay ku soo saartay baaq ay ku taageeraysay go'aankii Guddoomiyaha Aqalka Sare oo ku baaqayay in la isugu yimaado wadatashi Qaran[9]. Halka Puntland iyo Jubaland ay iyagu dhaliiileen howlihii Golaha Shacabka iyo GMDQ ee ku aaddanaa nooca doorashada iyo xilligeeda.
Dhamaan arrimahaa sare ku xusan waxa ay sare u qaadayaan rajada ah in shirka Dhuusamreeb ay ka soo bixi doonto natiijo horseedda in dalka ay ka dhacdo doorasho heshiis lagu yahay nooceeda iyo xilligeedaba.

Marna lagama filayo in madaxda ku shirsan Dhuusamareeb ay iyagu soo jaangooyaan nooc doorasho oo gaar ah ama xilli xaddidan oo ay qabsoomayso, sababtuna waa ayaga oo talo ku yeelan kara laakiin aanan lahayn awood dastuuri ah oo ay ku jaangooyaan hawlahaas. Waxa laga filayase waxa ugu weyn in ay caddeeyaan in ay isku mawqif ka yihiin diidmada habraacii dastuurka baal-marsanaa ee uu Golaha Shacabku u maray meel-marinta xeerarka dhammaystiraya sharciga doorashada 2020 iyo sidoo kale, qorshaha GMDQ oo ka baxsan xayndaabka waqtiga dastuuriga ah ee xil-haynta Barlamaanka iyo Madaxweynaha, arrinkaa oo gogol xaar u noqon doona in la isugu yimaado shir wadatashi Qaran oo la muddeeyay, goobtiisana la asteeyay, kaasoo ay ka soo baxdo doorasho heshiis lagu hayay. Haddii Dhuusamareeb natiijada caynkaa ah ka soo baxdo waa guul dhaxal gal oo u soo hooyatay ummadda Soomaaliyeed.

Beesha Caalamku waa ay soo dhaweysay shirka Dhuusamareeb waxa ayna tibaaxday inuu hordhac u yahay shir kale oo dhammaytir ah oo lagu wado inuu dhex-maro madaxda Dawladda Federaalka

[9] Dowlad Goboleedka Hirshabeelle, Xafiiska Madaxweynaha, Warsaxaafadeed, 09/06/2020

iyo madaxda Dhuusamareeb ku shirsan[10]. warar aan la xaqiijin ayaa sheegaya in ay Beesha Caalamku ku kala aragti duwan tahay nooca doorashada iyo xilliga ay qabsoomayso, iyadoo la soo warinayo in qaar kamid ah ay taageersan yihiin qorshaha Golaha Shacbka iyo GMDQ, kaasoo ah in waqti dheeri ah loo helo qabashada doorashada qof iyo codka ah ee ku xusan sharciga doorashooyinka 2020, halka qaar kalana la soo warinayo in ay qabaan in haddii laga gaari waayo doorasho qof iyo cod ah, in la qabto doorasho dadban, si aanu dalku u waajihin xasillooni darro siyaasadeed oo laga fursan karo. Si kasta oo ay ahaataba, natiijada ka soo baxda Dhuusamareeb waxa ay noqon doontaa mid gundhig u ah mustaqbalka siyaasadeed ee dalka, waxayna hagi doontaa nooca doorasho -oo ay tahay in ay dalka ka dhacdo- iyo xilligeeda.

Ugu dambeyn waxaa marag-ma-doonto ah in Madaxweyne Farmaajo uu qabtay howlo badan oo wax ku ool u ah dalka, haseyeeshee waxa uu ku fashilmay ilaalinta labo arrimood oo saldhig u ah wadajirka iyo midnimada ummadda Soomaaliyeed, kuwaas oo la'aantood shaqo kasta oo la qabto ka dhigaysa hal bacaad lagu lisay, labadaa arrimoodna waxa ay kala yihiin hannaanka federaalka dalka oo uu isku dayay madaxweynuhu in uu baalasha ka rifo iyo nidaamka dimuquraadiyadda iyo talo-wadaagga oo uu waqti badan ku bixiyay ciriiri gelintiisa, labadaa arrimoodna waa kuwa u gogol xaaray qabsoomidda shir-madaxeedka Dhuusamareeb. Waxaa intaa dheer in farsoomooyin siyaasadeed oo uu madaxweynuhu is lahaa aad ku heshid taageero shacab ay imminka u muuqato mid dusha ka saaraysa culaysyo siyaasadeed oo aanu qaadi karin, taasoo ku qasbaysa in uu dastuurka jebiyo ama uu waayo shacabkii uu taageeradooda raadinayay. Ilo ku dhow madaxtooyada ayaa laga soo xiganayaa in madaxweynaha loo geeyay xeerka matalaadda gobolka Banaadir si uu u saxiixo, kaasoo aan weli loo dirin Aqalka Sare si uu ugaga doodo una meel-mariyo, ka gaabiska uu madaxweynuhu ka gaabiyo saxiixa xeerkaa isaga ah, waxaa uu ku luminayaa taageero shacab oo uu is lahaa u keydso doorashada, halka haddii uu saxiixana uu noqonayo mid baal-maray dastuurka.

[10] United Nations Assistance Mission in Somalia - UNSOM, UNSOM waxa ay soo dhoweynaysaa kulanka qorsheysan ee Madaxda dowladaha xubnaha ka ah Dowlada Federaalka ee ka dhacaya Dhuusamareeb, https://www.facebook.com/501491853239294/posts/3142496029138850/ 7 July.

Haddaba, si loo dhayo boogihii hore, loogana hortago dhaawacyo cusub qormadan kooban waxa ay soo jeedinaysaa talooyinka hoos ku qoran:

1. In madaxda ku shirsan Dhuusamareeb ay ka fogaadaan qodobada keeni kara kala aragti-duwanaashaha, wadahadalkoodana ay ku koobaan arrimaha doorashooyinka oo haatan mudnaanta leh.
2. Maadaama doorashada qof iyo cod ay ka dhalanayso muddo kordhin, waa in ay ku baaqaan shir wadatashi Qaran oo looga arrinsanayo nooca doorashada suurogalka ah, oo ku dhici karta xilliga dastuurku qeexayo.
3. In Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BFS iyo Xisbiyada Siyaasadeed ee Dalka, gaar ahaan Madasha iyo Wadajir, looga mahadnaqo kaalintii ay ku lahaayeen dhiirigelinta wadaxaajood miro-dhal ah oo dalka ka samata bixiya qalaalase siyaasadeed.
4. In Madaxweynaha iyo Guddoonka Golaha Shacabku ka fogaadaan wax kasta oo carqalad ku noqon kara shirka Dhuusamareeb, soona dhoweeyaan qabsoomidda shirweyne Qaran oo looga arrinsanayo nooca doorashada -dalka ka dhici doonta- iyo xilligeeda.
5. In GMDQ uu isu diyaariyo la jaanqaadka natiijooyinka ka soo baxa shirweynaha Qaran ee looga arrinsan doono nooca doorashada iyo xilligeeda, isla markaana aanu isku dhejinin qorshaha waqtigu ka dhacayo ee uu soo bandhigay.
6. In Shacabka Soomaaliyeed u midoobaan taageeridda iyo ka miro-dhalinta wadaxaajoodyada ka billowday Dhuusamareeb iyo kuwa la filayo in ay ka dambeyn doonaan, si marxaladdan kala-guurka ah looga gudbo dalka iyo dadka oo bad qaba.
7. In Beesha Caalamku fursad siiso madaxda Soomaaliyeed, dhiirigelisana wadaxaajoodka bilowga ah, kana fogaato in ay ku cadaadiso madaxda ama u ololayso in la qaato nooc doorasho oo gooni ah oo ay iyagu door bidayaan, taasoo aysan duruufta siyaasadeed ee dalku saamaxaynin, horseedna u noqon karta qalalaaso iyo xasillooni darro siyaasadeed.